

8. Miyuunase ku helin Adigoo caydhi ah oosna ku hodminin (kuu waxyooinin).
9. Ee Agoonta ha xoogin (hana dhibin).
10. Ka wax su'aalina ha canaan.
11. Nicmada Eebahaana ka sheeke (ku mahadi).

وَوَجَدَكَ عَائِلًا فَأَغْنِي ﴿٨﴾

فَأَمَّا الْيَتِيمَ فَلَا تَهْجُرْ ﴿٩﴾

وَأَمَّا السَّائِلَ فَلَا تَنْهَرْ ﴿١٠﴾

وَأَمَّا بِنِعْمَةِ رَبِّكَ فَحَدِّثْ ﴿١١﴾

Suuraddani waa Suurad wayn, sida suuradaha Quraanka ee kalaba, waxayna ku soo dagtay mar Nabigu (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eeba ha yeelee) Xanuunsaday Gaaladuna dheheen Maxammad shaydaankiisii wuu ka tagay iyagoo ula jeeda Malaku-Jibriil oo waxyiga dib ula yar dhacay, Eebana wuxuu Suuradda ku sheegay nimooyin uu Nabiga siiyay, iyo Agoonka inaan la dhibin, kuwa dhibaataaysanna ee wax warsanna aan la canaan, Nicmada Eebana lagu mahadiyo.

Rasuulkuna wuxu yidhi Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eeba ha yeelee: «Hodontinnimadu ma aha xoolo Badni, Laakin Hodontinnimadu waa Hodonnimada Nafta». Waxaa wariyay Bukhaari iyo Muslim. Ad-Duxaa (1-11).

Suurat Ash-Sharx

سُورَةُ الشَّرْحِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Miyaannaan kuu waasicinin Laabta (kuu nuurin).
2. Oonnaan kaa dajinin culayskii.
3. dhabarka kaa cusleeyay.
4. Miyaannaan kor yeelin magacaaga (xusiddaada).
5. Cidhiidhina waxaa ku dhaw fudayd (faraj).
6. Cidhiidhina waxaa ku dhaw fudayd.
7. Ee markaad Salaadda dhammayso isku dhib (Samo fal).

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

أَلَمْ نَشْرَحْ لَكَ صَدْرَكَ ﴿١﴾

وَوَضَعْنَا عَنَّا وِزْرَكَ ﴿٢﴾

الَّذِي أَنْقَضَ ظَهْرَكَ ﴿٣﴾

وَرَفَعْنَا لَكَ ذِكْرَكَ ﴿٤﴾

فَإِنَّ مَعَ الْعُسْرِ يُسْرًا ﴿٥﴾

إِنَّ مَعَ الْعُسْرِ يُسْرًا ﴿٦﴾

فَإِذَا فَرَغْتَ فَانصَبْ ﴿٧﴾

8. Eebana (Khayr) ka rajee.

وَالرَّيْبَكَ فَارْجَبْ ﴿٨﴾

Eebe wuxuu Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eeba ha yeelee) ku mannaystay wanaag badan, sida Laabta oo loo Nuuray, Culayska oo laga dajiyay, iyo Magaciisa oo la kor yeelay, wuxuuna Eebe sheegay in cidhiidhi kasta faraj ku dhawyahay, wuxuuna faray in ducada iyo khayrkana lagu dadaalo, Eebana wanaag laga rajeyo.

Qataada waxaa laga wariyay in loo sheegay in Rasuulkii Eebe, «Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa ha yeelee» Asaxaabtiisii ugu bishaareeyay Aayaddan yidhina: «Hal cidhiidhi kama adkaado laba fudayd». Waxaa wariyay Ibnu Jarir. Ash-Sharx (1-8).



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Tiinka iyo Zeytuunka.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ
وَاللَّيْلِ وَالزَّيْتُونِ ﴿١﴾

2. Iyo Dhuuri Siina.

وَطُورِ سِينِينَ ﴿٢﴾

3. Iyo Magaaladan Aaminka ah (Maka).

وَهَذَا الْبَلَدِ الْأَمِينِ ﴿٣﴾

4. Ee waxaana ku abuuray Dadka Muuqaal toosan.

لَقَدْ خَلَقْنَا الْإِنْسَانَ فِي أَحْسَنِ تَقْوِيمٍ ﴿٤﴾

5. Kaddibna waxaan u celinaynaa hoos (gabow dartiis).

ثُمَّ رَدَدْنَاهُ أَسْفَلَ سَافِلِينَ ﴿٥﴾

6. Hase yeeshee kuwa rumeeyey xaqa camalwanaagsanna falay, waxay mudan Ajri aan go'aynin.

إِلَّا الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ فَلَهُمْ أَجْرٌ

عَبْرٌ مُّتَمُّونَ ﴿٦﴾

7. Ee Maxaa Gaalada u sababay beenninta Qiyaamada intaas ka dib.

فَمَا يَكْذِبُكَ بَعْدُ بِالذِّينِ ﴿٧﴾

8. Miyuusan Eebe ahayn kan ugu xukun wanaagsan. (Eebaa xukun wanagsan).

أَلَيْسَ اللَّهُ بِأَحْكَمَ الْحَاكِمِينَ ﴿٨﴾

Suuraddani waxay ka Warrami sida Eebe u Abuuray Dadka, una Wanaajiyey Abuurkiisa, hadana ugu Celin Gabow iyo Tabar yari Ciddii Cimrida, Eebana wuxuu ku Abaar marin kuwa Wanaagga Falay Wanaag iyo Ajiraan Dhamaanayn, Eebana waa kan Xukunkiisu Caadilka iyo Xaqa yahay uguna Fiican yahay.

Abuu Hureere waxaa laga wariyey: Hadduu mid idinka mid ah Akhriyo Suuraddan iyo Dhamaadkeeda ha yiraahdo:

waxaan ka mid ahay kuwa Marag Furi. At-Tiin (1-8).